

Jaarka qaali ahow,

Iyaddoo jiilaalku soo dhow yahay, waa wakhtiga loo diyaar garoobayo barafka, barafka adag, iyo heerkulka oo aad u qabooba. Hagahan waxa uu kaa caawiyaa adiga yo qoyskaaga, saaxiibadaa, iyo jaarkaagu inay u diyaar garoobaan cimilada soo socota. In ay bulshaddayada ahaato mid bedqabta waa masuuliyada wadareed. Gudaha, waxaad ka heli doontaa tilmaamaha sida loola shaqeeyo jaarkaaga, mulkiilayaasha ganacsiga, iyo wakaaladaha Magaalada si loogu ilaaliyo jidadkeena iyo marinda badbaado jiilaalkan.

Fadlan sidoo kale ka warqab saaxiibadaa iyo jaarka–gaar ahaan dadka degen guryaha ee si daran ay u saamaysay cimilada qabow oo ay ku jiraan dadka waa wayn, dadka qaba dhibaatooyinka caafimaadka khatarta ah, iyo jaarka aan guryaha ku jirin.

Haddii aad caawimo u baahan tahay ama aad qabto su'aalo kasta oo aan xaalad degdeg ahayn, soo wac 3-1-1 Kaalmooyinka xaaladaha degdega ah, soo wac 9-1-1 isla markaaba

Fadlan hayso hagahan ama la wadaag qof u baahan.

Waxaan rajaynayaa inaad haysato jiilaal badbaado iyo caafimaad leh!

Michelle Wu
Duqa Magaalada Boston

## LAMBARADA MUHIIMKA AH

Ee gurmadyada, soo wac 9-1-1

Wixii aan ahayn xaaladaha degdega, soo wac **3-1-1 ama 617-635-4500**

Boston Water & Sewer:
**617-989-7000**

Kaalmada Shidaalka ABCD:
**617-357-6012**

Eversource:
**800-592-2000**

DCR:
**617-626-4973**

National Grid Gas:
**800-322-3223**

MassDOT:
**857-368-6111**

Verizon:
**800-837-4966**

MBTA:
**617-222-3200**

# JIILAALKA CILADA HAGAHA 2023-2024

CITY of BOSTON

# JIILAALKA CILADA HAHA 2023-2024

Si laguugu wargeliyo waxa ku saabsan xaaladaha degdega ah ee barafka, baabuur dhigashada mamnuuca ah, daahida dugsiga iyo baajinta:

- Booqo **boston.gov/snow**
- Nagala soco @CityofBoston
- Kooto ka samayso fariimaha digniinta magaalada bogga **boston.gov/alerts**
- Ka soo deji abka Boston 311 app telefoonka gacanta



Hagahan waxaa laga heli karaa **boston.gov/snow** isagoo ah luqadda:

Español | Spanish
简体中文 | Simplified Chinese
繁體中文 | Traditional Chinese
Kreyòl ayisyen | Haitian Creole
Português | Brazilian Portuguese
Soomaali | Somali
Kriolu | Cabo Verdean Creole
Русский | Russian
Français | French
Tiếng Việt | Vietnamese
Arabic | العربية

CITY of BOSTON

2415-02

## BANAYNTA MARINTA JIDHKA DHINACIISA

Waxa aanu waydiinaa dadka degan dhismayaasha iyo mulkiilayaasha ganacsiga inay xaadhaan barafka, barafka milaya, iyo barafka yaala jidadka dadku maraan iyo meelaha dadka lugta ah maraan ee ku dhegan dhismahaaga. Duufaanka kadib, waxaa lagaa codsanayaa inaad ka banayso barafka aagagan:

- 3 saacadood gudahood marka barafka soo daataa dhammaaday, ama
- 3 saacadood ka dib qorax soo baxa haddii baraf soo daato habeenka gudahiisa.

Ka qaad barafka meelaha siman ama ka dhiga sida heer siman sida suuraga;lka ah. Marinada jidhka dhinacooda waa in laga baneeyaa barafka si loo sameeyo ugu yaraan dhabo 42-inch baladhkeedu yahay si ay mari karaan kursi curyaanka iyo qalabka lagu riixo dhallaanka.

Qaybta Xoojinta Koodhka waxay u jari doontaa ganaaxyo dadka guryaha degen iyo mulkiilayaasha ganacsiga ku xad gudbaya sharciyadan. Ganaaxyada waxaa la jari karaa maalin kasta ilaa xad gudubka wax laga qabto.

Ganaaxyada marinada jidka ag mara ee aan laga qaadin barafka waa sida soo socota:

- Dhismaha ganacsiga: $200
- Dhismaha la degen yahay, 16 ama qaybo badan: $100
- Dhismaha la degen yahay: $50

## IS DIIRI OO BADBAABDO AHOW

**Kiraystayaasha:**
Dhibaatooyinka kulaylinta? Marka koowaad, u dig mulkiilahaaga. Haddii mulkiilahaaga gurigu aanu ka jawaabin, wac **3-1-1** si aad warbixin u soo gudbiso.

**Qaybaha waa in la kulayliyaa ilaa:**

**68°** Laga bilaabo 7 subaxnimo - 11 habeenimo.

**64°** Laga bilaabo 11 habeenimo.- 7 subaxnimo.

**Mulkiilayaasha guryaha:**
Ma u baahan tahay caawimada bixinta kulaylinta? Codsado caawimada dhexda Dakhliga Hoose ee Gobolka Barnaamijka Kaalmada Tamarta Guriga (LIHEAP).
Booqo **boston.gov/home-heating** ama
soo wac **617-357-6012**

**Qof kasta:**

- Weligaa ha isticmaalin foornadaada kulaylinta.
- Kulayliyayaasha meesha waxay sababi karaan dab, markaad ha dhigin iyaga meel u dhow daahyada ama sheeyada dabka qabsan karo. Xusuuso inaad demiso ka hor inta aanad sariirta tegin.
- Igsaaska hawada banee si aad uga ilaaliso sumowga kaaboonka mono ogsaydhka.
- Ka hubi shaqaynta kaarboon mono ogsaydhka iyo qalabka qiiqa sheega.

## QASHINKA IYO DIB U WARSHADAYNTA QASHINKA

Muddada duufaanka barafka ah ee daran, waxa dhici karta in qashinka iyo ururinta dib u warshadaynta qashinka la joojiyo. Badankoda, duufaanka barafka ah ee daran waxa uu sababaa daahida adeegyada, markaas waxaanu ku waydiisanaynaa wada shaqayntaada iyo samirka.

Si loo arko jadwalka xaafadaada ee dib u warshadaynta qashinka iyo qashinka iyo in la ogaado waxay yihiin sheeyada dib loo warshadayn karo ama aan loo warshadayn karin gudaha Magaalada Biston, fadlan:

- booqo **boston.gov/trash-day**
- soo deji abka Trash Day, ama
- soo wac **3-1-1**

Shaqaalaha ayaa wakhti dhib badan ka haysatay gaadhida foostooyinka qashinka
iyo kaariyoonayaasha alaabta lagu qaado ee la dhigay xaga dambe ee barafka la soo xaadhay.
Fadlan banee aaga xaga kaabada ee ururinta ama dhig weelka meel ku xigta ama xaga hore ee barafka la soo xaadhay.

Waxaanu soo qaadi doonaa dhirka Kirismaska si loo qaado laga bilaabo 1 - 12. Haku ridin kiishashada qashinka.
Fadan ka saar geedka Kirismasta cagaha uu isku taago iyo qurxinta.
Haddii aad haysato labba maalmood oo alaabta dib meesha lagu warshadeeyo loo geeya, waxaanu qaadnaa dhirta Kirismaska maalinta koowaad ee dib u warshadaynta ee todobaadka. Dhig geedkaaga kaabadaada dhinaceeda 6 subaxnimo.

## LA MACAAMILKA JIDADKA BARAFKA LEH

Nagu caawi in aan jidadka ku furno cagafyada si loo xaadho iyo baabuurada xaalada degdega ah ee baarkinka ugu yaraan 20 fuudh oo ka fog isgoysyada oo aan ka badnayn hal fuudh kaabada jidhka dhinaciisa. Ha xanibin jidadka dhinacooda la maro, biyaha dab demiska jidka u ag yaal, sagxda isku xidhida, laymanka baaskiilka, jidka baabuurku maro, ama jidka baabuurkaaga.

inta lagu gudojiro xaalada degdega ah ee barafka, lacag dhimista baarkinka waxaa laga heli karo geerashyada leh baarkinka ansaxa ah qofka haysta istiikarka degenaanshiyaha. Lacag dhimista baarkinku waxay bilaabantaa labba saacadood ka hor bilowga xalada degdega ah ee barafka waxayna dhammaataa labba saacadood ka dib. Ma oggolaano fiidkii iyo baarkiinka habeenkii xaga Dugsiga Dad waynaha Boston wax abdan muddada dhacdooyinka barafka.

Eeg **boston.gov/snow** si aad u ogaato halka
aan baabuurka la dhigan muddada gurmadka barafka. Waxaan sidoo kale haynaa
Macluumaadka geerashyada lacagta la dhimo.

Mitirada baabuur dhigasho waxay dhaqan gal yihiin muddada barafka gurmadyada.

Istikarta baabuur dhigashadaada qofka guriga degen ha la arko gudaha 24 saacadood dhammaadka duufaanka.

Tidhig ayaanu kuu jiri oo waanu ku jiidi haddii aad baabuurka dhigato meesha gurmadka barafka lagu soo dhejiyay muddada gurmadka lagu dhawaaqay.

Xusuuso inaad ka banayso dhuumaha biyaha iyo goobta biyahu kaga shubmaan jidka.



Ka baabii dhammaan barafka ugu yaraan hal fuudh hareerta cod yareeyaha igsaaskaaga ka hor inta aanad istaadhin baabuurkaaga.

**Ka qaad kaydiyayaasha meesha 48 saacadood gudahood ka dib marka soo muuqashada barafka la qaaday. Fadlan ogow: meel kaydiyayaasha lama ogglo gudaha South End ama Bay Village.**